



## GOLAHA MUSTAQBALKA SOOMAALIYEED SOMALI FUTURE COUNCIL

---

### WAR SAXAAFADEED 15 May 2026

Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed wuxuu hambalyo iyo bogaadin u dirayaa dhammaan dhallinyarada Soomaaliyeed munaasabadda sannad guurada 81-aad ee ka soo wareegtay aas-aaskii halgankii dhallinyarada Soomaaliyeed, kuna beegan Maalinta Dhallinyarada Soomaaliyeed ee 15-ka May.

Goluhu wuxuu ka xunyahay in uu shacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamka ku wargeliyo in wada hadalladii siyaasadeed ee Magaalada Mogadishu ka socday 13 – 15kii May 2026 ee u dhexeeyey Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed, oo ay garwadeen ka ahaayeen xubno ka tirsan beesha caalamka ay fashilmeen sababo la xiriira in Madaxweynihii hore iyo maamulkiisa ay diideen heshiis siyaasadeed oo ku dhisan hannaan kala guur loo dhan yahay, is-afgarad qaran, iyo masuuliyad wadaag si looga gudbo firaqa dastuuriga ah ee ka dhashay dhammaadka muddo xileedka Madaxweynaha oo ku ekaa Maantay 15-ka May 2026.

Goluhu wuxuu wadhadallada uga qayb galay si niyad sami, masuuliyad, iyo daacadnimo leh, balse Madaxweynihii hore wuxuu doortay waddada khilaafka siyaasadeed, xasillooni darrada, iyo qalalaasaha amni.

Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed wuxuu markale xaqiijinayaa mowqifkiisa dastuuriga ah ee ah in muddo xileedkii Madaxweynaha uu ku ekaa Maanta oo ay bishu tahay **15 May 2026, si waafaqsan Dastuurka kumeel gaarka ah qodobkiisa 91-aad**. Sidaas darteed, Goluhu wuxuu Xasan Sheekh Maxamuud u aqoonsan yahay Madaxweyne hore.

Si loo ilaaliyo sii socoshada hay'adaha Dowladda, loogana fogaado firaq maamul, Goluhu wuxuu aaminsan yahay in xukuumadda Federaalka ay muddada kala guurka ah ku shaqeyso mabda'a awood fulineed oo xakamaysan (executive power restraint), kuna ekaato hawlo farsamo iyo maamul socodsiin, iyadoo ay ka reeban tahay go'aanno hal dhinac ah oo la xiriira arrimaha siyaasadda, dastuurka, doorashooyinka, iyo amniga qaranka.

Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed wuxuu ka digayaa in tallaabooyinka halka dhinaca ah ee Madaxweynihii hore ay sii kordhin doonaan xiisadaha siyaasadeed, dhaawicina doonaan sharciyadda dastuuriga ah, isla markaana wiiqi doonaan midnimada iyo xasilloonida dalka xilli Soomaaliya ay weli wajahayso khataro amni oo culus oo ay kamid yihiin kooxaha argagixisada Al-Shabaab iyo Daacish. Goluhu wuxuu si nabad ah oo sharci ah uga hortagayaa in Xasan Sheekh uu dalka ku sii hoggaamiyo xukun aan sharci iyo heshiis siyaasadeed lahayn.

Golaha Mustaqbalku wuxuu ugu baaqayaa Ciidamada amniga guud ahaan in ay illaaliyaan waajibaadka dastuuriga ah ee ka saaran illaalinta badqabka Dadka iyo Dalka Soomaaliya, ayna ogaadaan in Mudane Xasan Sheekh Maxamuud yahay madaxweyne hore, aysanna ka qaadan wax amaawiir fulineed ah. Sidoo kale, Goluhu wuxuu bogaadinayaa Ciidamada kala duwan ee geesiyaasha ah ee Cadowga Argagixisada kula diriraya furimaha dagaalka.

Golaha Mustaqbalku wuxuu dhigayaa gogol siyaasadeed oo looga arrinsan doono sidii loo badbaadin lahaa dowladnimada iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed xilliga kala guurka ah.

Ugu dambeyntii, Goluhu wuxuu u mahad celinayaa saaxiibada caalamiga ah ee taageeray geeddi-socodka wada hadalka, wuxuuna markale xaqiijinayaa sida ay uga go'antahay maareynta iyo xal u helista xilliga kala guurka siyaasadeed ah.

**Dhammaad**